# Sheekooyin illaa cayaaro - xittaa ku qoran luqaddaada

Jacaylka luqadu wuxuu ka bilaabmaa gacmo jeclaan leh *. Wax akhrintu waa wax-qabad loogu talagalay in si wadaag ah isla qabtaan waalidka iyo ilmaha, wuxuuna xittaa horumariyaa luqadda iyo hadalka ilmaha, dhagaysiga iyo xirfadda xoog saaridda iyo barashada ereyoyinka.

Markaad sheekooyin akhrineysid, waxaad sidoo kale ilmaha u fududeyneysaa ka qayb-galka kooxaha cayaaraha lagu qabto goobaha ay carruurta ku cayaaraan, xarumaha xannaanada ilmaha, xarumaha xannaano-maalmeedka qoyska, naadiyada, maktabadda ama barxadda guriga.

Waxyaabaha ku jira cayaaraha carruurta iyo xiriirka ka dhax-abuurmo markii ay cayaarayaan waa la kordhin karaa, xitaa haddii ay ku hadlaan luqado kala duwan, ayadoo la isticmaalaayo sheekooyinka maktabadda, sheekooyinka qoyska ama habka sheeko-qorista, halkaasoo qof wayn uu erey-erey u qorayo sheekada uu ilmaha sheego.

## Aynu sheegno sheekooyin iyo sheeko-xariir!

### NIYAD-GELIN

Sheeko akhriye niyad-gelin leh ayaa carruurta ku niyad-geliyo inay yaabaan, wuxuuna siiyaa awood ay ku fekeraan iyo fal-celiyaan, wuxuuna ku dhiirigeliyaa inay dad kale la wadaagaan waayo-aragnimadooda, ayadoo sii faah-faahsan u sharxin sheekada.

Ilmuhu wuxuu saameyn ku yeelan doonaa sida sheekada xiiso u yeelan doonto markii wax akhrinta la hakiyo, waxaa sidoo kaleba waxtar lahaan doono tilmaamo-cayareedka qofka wayn iyo su'aalaha ay weydiiyaan iyo sidoo kaleba isla fiirinta sawirada. Waa maxay fikradaha iyo dareemada ay ku abuurtay sheekada? Casharka ama farriinta muhiimka ah ee sheekadu ayaa ku kobcaa maskaxda cunugga, qaybaha kala duwan ee sheekadana si tartiib ah ayay isku imaanayaan.

### BARO SHEEKADA

Waa inaad barataa sheekada ka hor inta aadan u sheegin ilmaha adigoo marka hore sii fiican u baranaaya qorshaha sheekada iyo maskaxda ku haynaaya xaaladda iyo jilayaasha. Waxaa kugu filan inaad xasuusato dhowr jumlado. Uma baahnid inaad qoraalka sheekada dib ugu celiso si eray-eray ah. Muuqaal-maskaxeedka qofka sheekada sheegaayo ayaa soo jiidanaayo khayaal abuurka ilmaha, marka ay ku kalsoon yihiin.

### KU CELI

Qaybaha asaasiga ah ee sheeko xariirka ama sheeko kale waxaa ka mid ah:

- Hab-dhiska "Waxaa jiri jiray ..." (iska dhigidda inay arrintu horey u dhacdey)
- qorshe cad iyo jilayaal
- khilaaf ka dhexeeya dad fiican iyo dad xun
- halyeeyga oo ka adkaanaayo caqabadaha
- sheekada ku dhammaado si farxad ah.

Ilmuhu wuxuu ku farxaa sheeko leh wax la xiriira fikradahooda hadda. Waa inaad ilmaha u akhriso iyo ku cel-celiso sheekada ilaa iyo inta uu doonaayo inuu dib u maqlo. Cabsida waa wax xiiso-gelin lahaan kara, laakiin wa in aysan sheekada noqon mid aad u xiiso badan, sababtoo ah carruurta oo dhan waxay u dhaqmaan si kala duwan. Ilmuhu waa inaan lagu dhaafin cabsi.

### HALKEE KA HELI KARAA SHEEKOOYIN?

Liiska buugaagta ka mid ah **Sheekooyinka maktabadda**, oo si cayaar ah ilmaha ku dhiirrigeliya sheeko-sheegid, wuxuu qeexayaa luqadaha buug-kasta lagu heli karo maktabadaha. Tani macnaheeda waxaa weeye in carruurta isla waqti ay xulan karaan buug uu qoyskooda ugu akhrin karo luqaddooda hooyo. Habkan, sheekooyinka uu qoyska isla akhriyo wuxuu ku caawinayaa dhisidda muuqaal la wadaago ee cayaaraha hal-abuurka ah - xittaa haddii ay ku hadlaan luqado kala duwan.

* Päivi Heikkilä-Halttunen



Sheekooyinka ku xiran alaabooyinka qoyska iyo sawirrada waxay xiiso u yihiin carruurta iyo waa kuwo horey loo "bartay". Sheekooyinka noocan ah, marka lala wadaago koox carruur ah, waxay sidoo kale siin karaan waxyaabo ay si wadaag ah ku cayaaraan.

Sheekooyinka cajiibka ah ee carruurtu khayaal-abuurey waxay xittaa noqon karaan meel ay cayaartooda ka bilaabaan ama waxay kordhin karaan hal-abuurka cayaaraha kooxda. Habka **sheeko-qorista**, tusaale ahaan, qofka wayn wuxuu leeyahay: "Sheeg sheeko ama sheeko xariir, sida aad rabtidna u sheeg. Waxaan u qori doonaa erey-erey sida aad u sheegtay. Markaad dhammeyso sheekada, waan kuu akhrin doonaa si aad u hagaajiso ama wax uga beddesho haddii aad rabto." Habka sheeko-qorista, qofka wayn ma oga waxay sheekada ku saabsan tahay, ma qiimeyn karo mana toosin karo dhinaca ay sheekada u socoto. Qofka sheekada sheegaayo ayaa go'aaminaayo waxay rabaan inay sheegaan, sida ay rabaan inay u sheegaan iyo waxa ay doonayaan inay ka reebaan sheekada.

## Sheekooyin iyo sheeko xariir ku kobci cayaaraha!

### WAALIDIINTU WAXAY TAAGEERI KARAAN CAYAARTA

Waalidiinta waxay ilmaha la wadaagi karaan aragtidooda ku saabsan qaybta sheekada ee niyad-geliyay ilmaha. Kani wuxuu wax ka qabanaysa mawduucyada uu ilmo walba xiiseeyo, wuxuuna ku salaysan yahay sheekooyinka uu kooxda oo dhan yaqaano.

Sheekooyinka waa in lagu cel-celiyaa ayadoo la isticmaalaayo sawirro, heeso, qoob ka cayaar iyo qaabab kale goobaha xannaanada carruurta, naadiyada, goobaha cayaarta iyo maktabadaha markii lagu jiro saacadaha sheekada, waxaana lagu samayn karaa luuqado kala duwan. Tani waxay carruurtu ka caawisaa inay helaan aragtiyo kala duwan oo ku saabsan dhacdooyinka sheekada, wuxuu ballaarin doonaa aragtidooda iyo midba midka kale ayuu niyad-gelin doonaa.

Habkaan, waxaa **cayaar sheeko leh** ee ka dhexeeya carruurta iyo dadka waa-wayn laga abuuri karaa sheekooyinka carruurta sida ugu badan niyad-geliya, ayagoo isku daraaya ama wax ka beddelaaya qaybo ka mid ah sheekooyin kala duwan. Wax la dhisidda carruurta si wada-jir ah ayadoo lala xaajoonaayaa - xaalad khayaali ah

- jilayaal uu ilmo walba laftigiisa doorto
- xeerar tilmaamaya sida loo fuliyo doorarka
- sheeko hordhac ah oo sii kordho inta uu cayaarta ka socdo.



### GOOBAHA CAYAARAHA IYO XARUMAHA XANNAANADA WAXAY TAAGEERI KARAAN CAYAARTA

Markii la qabanaayo cayaar-aha sheekada leh ee carruurta da'doodu ka yar tahay da'da dugsiga, barayaasha xirfadlayaasha ah si firfircoon ayey uga qayb galaan cayaarta ayagoo ku labbisanaayo dhar gaar ah, iyo cayaaraayo jilayaal khayaali ah. Sababta waxaa weeye, cayaaro badan oo ay cayaaraan carruurta yaryar ma lahan carruur wayn oo la cayaaro oo u gudbiyo caadooyinka cayaaraha, waxaana laga-maarmaan ah in dadka waa-wayn ku caawiyaan.

Jilayaal ahaan, dadka waa-wayn waxay fursad u haystaan - intii laga taageerayo dadaallada carruurta iyo is-dhexgalka labada dhinac - in si tartiib ah cayaarta ku soo bandhigaan is-beddelo tartan leh oo ay caawiyaan carruurtaa dhibaato ku qabo ka qayb-galka iyo ku biirinta cayaarta.

Maalinta soo socota ama waqtiga xiga kala hadal carruurta wixii dhab ahaan dhacay oo ka wada fikira sheeko niyad gelin leh, oo leh is-beddelo wayn. Barayaasha xirfadlayaasha ah ee carruurta da'doodu ka hooseyso da'da dugsiga waxay si firfircoon uga qayb-qaadanayaan horumarinta sheekada cayaarta iyo bay'ada, waxay ka xaajoodaan shuruucda cayaarta, ayagoo u dhaqmayaa si dad la mid ah carruurta.

Waa cayaar, ma ahan tababarka masraxa. Ixtiraamidda iyo dhegeysiga fikradaha ilmaha - garashada sheekada uu ilmaha abuuray - waa waxa mudnaan wayn u leh cayaaro wanaagsan. Marka ugu horeysa, dadka wayn dhib ayuu ku yahay inay si daacdnimo ah uga qayb-qaataan cayaar-jilitaanka, laakiin markii ay dhowr jeer sameeyaan way kuu fiicnaan doonaan. Cayaarta iyo sheeko xariirka waxay leeyihiin qaab-dhismeed isku mid ah. Wareejinta khayaal abuurka sheeko xariir cayaar ah waa hal ka mid ah hababka ugu waxtarka badan ee lagu hormarin karo cayaarta.•

Lähde: Hakkarainen, P. & Bredikyte, M. 2013.
Kehittävän leikkipedagogiikan perusteet.

Julkaistu 2018 Etelä-Suomen
aluehallintoviraston rahoituksella.

Merkityksellinen Suomessa -toimintaohjelman
tavoitteita tukeva Satukaravaani-hanke /
Helsingin, Hyvinkään, Kirkkonummen ja
Porvoon kirjastot ja varhaiskasvatus